

Nooca Gaaban

Isbeddelo la xiriira federaalka awgood, laga bilaabo Janaayo 1, 2027, xubnaha ka tirsan OHP qaarkood ee da'doodu tahay 19–64 waa in ay buuxiyaan xeerarka shaqada ama hawsha marka ay codsadaan ama dib u cusbooneysiyaan caymiskooda. Tilmaamahani waxay sharaxayaan sida loogu qalmo wax la iska dhaafayo ama loo buuxiyo xeerarka, iyo sida loogu xirnaado OHP marka aad la kulmayso hoy la'aan.

✓ Waxaa Dhici karta in Lagaa dhaafo Xeerarka

Calaamadee haddii mid ama ka badan oo ah kuwani ku khuseeyaan. Haddii ay sidaas tahay, waxaa dhici karta in aadan u baahnayn in aad shaqeyso, tabarucaad sameyso, aado dugsi, ama sameyso tababar ama hawlo kale si aad u sii haysato OHP aad leedahay. Waxaa dhici karta in lagaaga baahdo in aad na siiso caddeyn.

- ✓ Waxaad qabtaa naafanimo ama xaalad caafimaad oo halis ah ama naafanimo keenaysa
- ✓ Waxaad daryeeshaa ilme da'diisu ka yar tahay 14 jir
- ✓ Waxaa dhawaan lagaa sii daayay jeel ama xabsi
- ✓ Waxaad leedahay xanuunka isticmaalka khamriga ama daroogada, ama waxaad ku jirtaa daaweyn
- ✓ Waxaad tahay Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska
- ✓ Waxaad tahay qof soo halgamay oo leh qiimeynta naafanimada oo buuxda
- ✓ Waxaad daryeeshaa qof da'kasta leh oo qaba naafanimo ama xaalad caafimaad oo halis ah ama naafanimo keenaysa
- ✓ Waxaad tahay qof uur leh (ama ahayd, sanadkii la soo dhaafay oo helaya OHP)
- ✓ Waxaad lahayd ama leedahay Medicare Part A ama Part B, ama waxaad aad u qalantaa Medicare
- ✓ You had or have Medicare Part A or Part B, or you qualify for Medicare
- ✓ Waxaad ku jirtay daryeelka ilmo korsiga oo aad ka yar tahay 26 jir
- ✓ Waxaad ugu yaraan hal habeen ku qaadatay bukaan ahaan isbitaal ama meel la mid ah

Waxaa dhici karta in aad u qalanto wax la iska dhaafayo oo kale oo aan kor ku qornayn.

Waxaa dhici karta in aad u qalanto wax la iska dhaafayo oo kale oo aan kor ku qornayn.

Booqo <https://OHP.Oregon.gov/HR1> si aad u hesho liiska buuxa.

Aan hubin miyaa in mid ka mid ah kuwani ku khuseeyo? U sheeg OHP si kastaba ha ahaatee.

Xeerarka Shaqada ama Hawsha ee OHP:

Waxa ay tahay In la ogaado Haddii aad La kulmayso Hoy la'aan



Uma qalantid miyaa Waxa la iska dhaafayo? 3 Siyaabood oo Loo buuxiyo Xeerarka Shaqada ama Hawsha ee OHP

Haddii mid ka mid ah waxyaabaha la iska dhaafayo aysan ku khuseynin, halkan waxaa ku qoran sida loo buuxiyo xeerarka.

1

Dakhliga

Sameyso wax ka badan \$580 bishii.

2

Dugsiga

Aad diiwaan gashan tahay ugu yaraan waqtiga barkiis.

3

Saacadaha

Shaqo isku dhafan, tabarucaad, dugsi, ama tababar loogu talagalay 80 saacadood bishii.



Sida Loogu Xirnaado OHP

Hubi in degaankaagu yahay mid macluumaadkiisu cusub yahay. Uma baahnid cinwaan joogto ah si aad u hesho ama u sii haysato OHP. Ka dhig lambarkaaga telefoonka, email-kaaga, ama cinwaankaaga boostada mid cusub haddii aad karto.

Koontadaada Dhanka internet-ka ee ONE ka fiiri <https://benefits.oregon.gov/>. Waxaad sameyn kartaa koontada dhanka internet-ka ama isticmaal app-ka Oregon ONE Mobile ee lacag la'aanta ah si aad kiiskaaga u hubiso wakhti kasta, meel kasta. Waxaad sidoo kale arki kartaa ogeysiisyadaada.

La shaqee kaaliye ay aqoonsan tahay OHP. Mid ka hel <https://oregonhealthcare.gov/GetHelp>.

Go'aanso haddii aad jeclaan lahayd in aad magacawdo wakiil la oggol yahay si uu kuu caawiyo. Kani waa in uu noqdaa qof kale oo aad ku kalsoon tahay. OHP waxay la soo xiriiri doontaa adiga iyo qofkaasba si aad u heshaan ogeysiisyo, waxayna kaa caawin karaan in aad soo dirto caddeyn ama aad ka soo jawaabto codsiyada.



Haddii OHP Macluumaad Dheeraad ah Kaaga Baahan tahay

Waxaad heli doontaa ogeysiin sheegaysa waxa la dirayo, sida, iyo goorta ay tahay. Ma haysatid miyaa warqada saxda ah ee ku qoran ogeysiintaada? U sheeg OHP waxa aad haysato. Waxaa jiri karta siyaabo kale oo aad ku muujiso caddeyn.

Xeerarka Shaqada ama Hawsha ee OHP:

Waxa ay tahay In la ogaado Haddii aad La kulmayso Hoy la'aan



Waxa aad Sameyn Karto Si aad u Sii haysato OHP aad leedahay

- ✓ Cusbooneysii macluumaadka lagaala soo xiriirayo iyo wada xiriirka aad doorbidayso. Fariinta qoraalka ah iyo email-ka ayaa si cusub loo hagaajiyay!
- ✓ Ka soo jawaab ogeysiin kasta iyada oo leh taariikh ay ku eg tahay.
- ✓ Hubi waxyaabaha la iska dhaafayo ama siyaabo kale oo lagu buuxiyo xeerarka.
- ✓ Go'aanso haddii aad jeclaan lahayd in aad magacawdo wakiil la oggol yahay si uu kuu caawiyo.

Halka Laga helo Caawimaad oo laga Ogaan karo Waxyaabo Dheeraad ah

Ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan HR1

<https://OHP.Oregon.gov/HR1> →



Dhanka internet-ka - isticmaal App-ka Oregon ONE Mobile ee lacag la'aanta ah ama samee koontada Dhanka internet-ka ee ONE

<https://benefits.oregon.gov/>

Wac

1-800-699-9075 (Wicitaanada gudbinta waa la soo dhaweynayaa)

Hel kaaliyaha OHP

<https://oregonhealthcare.gov/GetHelp>

Booqo xafiiska Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon

Xafiiska degaanka ka hel
<https://ODHSoffices.oregon.gov>

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la'aan ah. OHP kala xiriir one.communications@odhsosha.oregon.gov.